# Waqtiyada la qabashado ballanta imaanshaha ee ku yaala Tilmaamaha eVaka ee loogu talagalay mas'uuliyiinta

21/03/22

Kooxda eVaka

# Waxa ku jira gudaha tilmaamaha:

**1. Jadwalka qabsashada ballanta ee loogu talagalay mas'uuliyiinta**

- Waqtiyada la qabashado ballanta imaanshaha ee loogu talagalay ilmahaaga
- Ka warbixinta maqnaanshaha ilmahaaga

**2. Jadwalka qabsashada ballanta ee loogu talagalay mas'uuliyiinta ee ku jira app-ka telefoonka gacanta**

- Ka qabashada waqtiyada imaanshaha ilmahaaga app-ka telefoonka gacanta
- Ku soo sheegida maqnaanshaha ilmahaaga app-ka telefoonka gacanta

# Jadwalka qabsashada ballanta ee loogu talagalay mas'uuliyiinta

- ➢ Ka gal eVaka barta https://espoonvarhaiskasvatus.fi
- ➢ Xagga sare ee bogga hore waxaad ku arki doontaa cinwaanka 'Kalenteri'




- ➢ Gudaha jadwalka eVaka, waxaad ku soo sheegi kartaa maqnaanshaha ilmahaaga waxaadna qabsan kartaa waqtiyada imaanshaha ilmahaaga.




- ➢ Haddii qoyskaaga ay ku jiraan dhowr carruur ah oo ku jira daryeel-maalmeedka, jadwalka ayaa muujin doona macluumaadkooda oo dhan.

# Waqtiyada la qabashado ballanta imaanshaha ee loogu talagalay ilmahaaga

- **Waqtiyada imaanshaha waa in la qabsadaa 6 galabnimo markay tahay Isniinta isbuuca hore, markaas kadib boos-celinada waa la xiri doonaa waxaana kaliya wax ka beddeli karaan shaqaalaha. Kahor intaan boos-celinta la xirin, waad bedeli kartaa adoo qabsanayo ballan cusub oo loogu talagalay taariikh-da(aha) la doortay. Boos-celinta cusub ayaa beddeli doonta tan horay loo qabtay.**

- Guji ‘Tee varaus’ si aad u furto shubaako soo baxdo.




- Gudaha shubaakada soo baxda, ka xulo:
  - Carruurta aad rabto inaad u boos-celiso
    - Xulo carruurta
  - Soo noqnoqoshada:
    - Dooro ‘Päivittäin’ ama ‘Viikoittain’ (wixii boos-celin muddo dheer ah)
  - Intay socon doonto ballanta la qabsaday
    - Taariikhaha aad rabto inaad ballamaha qabsato
  - Waqtiga




- Jadwalku wuxuu u muujin doonaa waqtiyada imaanshaha loo qabtay ilmahaaga sida soo socota:




- Guji taariikhda ku taala jadwalka si aad u furto shubaakada soo baxda ee muujinaysa boos-celinta taariikhdaas iyo saacadaha dhabta ah ee ilmahaagu ku jiray daryeel-maameedka.



# Ka warbixinta maqnaanta ilmahaaga

- Guji ‘Ilmoita poissaolo’ si aad u furto shubaakada soo baxda.




- Gudaha shubaakada soo baxda, ka xulo:
  - Ilmaha aad rabto inaad ka warbixiso maqnaanshihiisa
  - Waqtiga maqnaanshaha
  - Sababta maqnaanshaha
    - Jirrada
    - Maqnaanshaha kale = fasaxyada, maalmaha fasaxa
    - Maqnaanshaha caadiga ah = maalmaha fasaxa ee soo noqnoqda sida ku cad heshiiska shaqada gelin la qabto (ma ahan fasaxyada ama maalmaha kale ee fasaxa ah)




- Jadwalka wuxuu u muujin doonaa maqnaanshaha ilmaha sida soo socota:



# Jadwalka qabsashada taariikhda ballanta ee telefoonka gacanta ee loogu talagalay mas'uulka

1. Gal eVaka
   https://espoonvarhaiskasvatus.fi




2. Ka fur liis-bogeedka geeska sare oo ka xulo 'Kalenteri' qaybta xigta.




3. Gudaha qaybta jadwalka, waxaad ku soo sheegi kartaa maqnaanshaha ilmahaaga waxaadna ka qabsan kartaa waqtiyada imaanshaha ee ilmahaaga.




# Waqtiyada ka qabashada ballanta imaanshaha ilmahaaga app-ka telefoonka gacanta

- **Waqtiyada imaanshaha waa in la qabsadaa 6 galabnimo markay tahay Isniinta isbuuca hore, markaas kadib boos-celinada waa la xiri doonaa waxaana kaliya wax ka beddeli karaan shaqaalaha. Kahor intaan boos-celinta la xirin, waad bedeli kartaa adoo qabsanayo ballan cusub oo loogu talagalay taariikh-da(aha) la doortay. Boos-celinta cusub ayaa beddeli doonta tan horay loo qabtay.**

- Guji 'Tee varaus' si aad u furto qaybta boos-celinta.




- Gudaha qaybta boos-celinta, ka dooro:
  - Ilmaha aad rabto inaad u boos-celiso
  - Soo noqnoqoshada:
    - Maalinle/isbuucle
      (wixii boos-celin muddo dheer ah)
  - Taariikhaha aad rabto inaad qabsato boos-celinta
  - Waqtiga




- Jadwalku wuxuu u muujin doonaa waqtiyada imaanshaha loo gaar yeelay ilmahaaga sida soo socota:



# Ku soo sheegida maqnaanshaha ilmahaaga app-ka telefoonka gacanta

- Guji ‘Ilmoita poissaolo’ si aad u furto qaybta ‘Ilmoita poissaolo’.




- Gudaha Ka warbixinta maqnaanshaha, ka xulo:
  - Ilmaha aad rabto inaad soo sheegto maqnaanshihiisa
  - Waqtiga maqnaanshaha
  - Sababta maqnaanshaha
    - Jirrada
    - Maqnaanshaha kale = fasaxyada, maalmaha fasaxa
    - Maqnaanshaha caadiga ah = maalmaha fasaxa ee soo noqnoqda sida ku cad heshiiska shaqada gelinka la qabto (ma ahan fasaxyada ama maalmaha kale ee fasaxa ah)




- Jadwalka wuxuu u muujin doonaa maqnaanshaha ilmaha sida soo socota:

